

1450 A

## Habraaca Codsiga

Qawaaniinta (*Regulation*)**1450 A**

Original Adoption: 09/29/2009

Effective Date: 09/30/2009

Revision Dates:

Review Dates: 03/20/2013

### I. UJEEDADA (PURPOSE)

Ujeedada Xeerkan waa in la abuuro habraac lagu dhaqmo marka tabarrucaad loo samaynayo Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis, ama barnaamij ay soo qaban qaabisay mid iyada la mid ahi. In kastoo tabarrucayaasha Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis la soo dhawaynayo ayna yihiin waxayaabo dheeraad ah ee hanaanka waxbarashada, ammaanka ardayda iyo taageero ku habboon ee qorshaha waxbarashada ayaa ah waxyaabaha ugu waaweyn ee Degmadu ka fekerayso marka ay aqbalayaan waqt tabarruce.

### II. CODSIYADA (APPLICATIONS)

- A. Ciddii danaynaysa inay u adeegaan tabarrucnimo waa inay isticmaalaan Xaashida codsigaDegmada. Xaasida ayaa noqon karta mid elegtaroonig ah ama hab warqadeed.
- B. Dhammaan codsiyada oo idil waxaa loo gudbinaynaa Xiriiriyaha Adeegyada Tabarrucaadka (Volunteer Services Coordinator) ama qof loo magacaabay fulinta hawsha.
- C. Qof tabarruc ah Kama shaqayn karo Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis (DDM)(MPS) ilaa codsigooda laga oggolaado ama ansixiyo.
- D. Dugsi kasta ama barnaamijkii ku barya ama tuuga tabarrucaashooda shabakadooda internetka, waa inay si toos ah ugu xiraan/lifaaqaan bogga Shabakadda tabarrucayaasha Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis (MPS Volunteers page) si loogu oggolaado tabarrucayaasha la filayo inay tas-hiilaad u helaan xaashiyaha munaasibka ah iyo fulinta hawsha.

### III. HABRAACA (PROCEDURE)

- A. Xiriiriyaha Adeegyada Tabarrucayaasha ama qofka loo magacaabay ayaa dib u eegi doona, aqabali doona ama diidi doona codsiyada tabarrucayaasha Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis. Dib u milicsiga waxaa ka mid ah, aanna keliya ku koobnayn:
  1. Haddii ay ama ayan qofku ama kooxdu si munaasib ah u codsan ama dalban inay noqdo/nodaan wadaage bulsho (a community partner);
    - a) Hadii la sameeyo go'aan in qofka ama kooxdu ay si munaasib ah u dalbadaan wadaage bulsho, xiriiriyaha adeegyada tabarrucu ayaa ku wargalin doona qofka ama kooxdam, isla markaasna u tilmaamaya habraaca munaasibka ah.

- b) Haddii la garto in qofka amakooxda ay si munaasib ah u codsaday/cadsadeen inay noqdaan tabarrucayaal Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis, qofka ama kooxdu waxaa loo qabanayaa kulan hanuunin ah.
  - 2. Hadii qofka ama kooxdu ay bixin doonaan adeegyo u baahan hubinta xaaladda dambiyeed ee taariikh nololeedkooda;
    - a) Haddii la garto in qofka ama kooxdu ay keenaan hubinta xaalad-dambiyeed taariikh-nololeedkooda, xiriiriyaha adeegyada tabarrucaadka ayaa la xiriiraya codsadaha/codsadeyaasha, isla markaasna ku jihaynaya fulinta hawsha;
    - b) Xiriiriyaha Adeegyada Tabarrucayaasha ayaa kala shaqaynaya Waaxda Shaqaalahaha dhamman qiimaynta hubinta xaalad dambiyeedyada taariikh nololeedka;
    - c) Codsadaha waxaa lagu wargalin doonaa natijada baaritaanka dambiyada la sameeyey. Haddii hubinta xaaladda dembiyada natijadeedu noqoto in la helo arrimo ka mammuucaya Degmadu inay aqbasho codsiga adeegyada tabarruca, Xiriiriyaha Adeegyada Tababarruca ayaa ku wargalin doona shaqaalahaha dugsiga ee ku habboon/munaasibka ah inaan codsiga la aqbalin oo keliya.
  - 3. Xirfado khaas ah ee caynkeeya ama la danayn karo ayuu tilmaamay codsaduhu, taasoo si wacan codsaduhu iyo barnaamijku isugu dhigmaan. Hadii codsaduhu/codsadeyaashu tilmaamaan xirfado khaas ah ama danayn dhammaystiraya yoolasha manhaj, codsadaha waxaa loo diri karaa Degmada si loogu daro liiska Ilaha Bulshada Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis.
- B. Haddii aan dusi khaas ah ama barnaamij aanu codsaduhu tilmaamin inuu yahay dugsiga ay danaynayaan, Xiriiriyaha Adeegyada Tabarrucu ayaa kalla shaqaynaya codsadaha meelaha la garnayo ee looga baahan yahay tabarruca Degmada, si uu ugu helo meelo shabbibi kara codsadaha.

#### **IV. MAS'UULIYADDA (RESPONSIBILITY)**

- A. Kormeeraha Guud, ama qof uu magacaabay Kormeeraha Guud, ayaa u qoondaynaya shaqaalahaha degmadu inay metelaan Xiriiriyaha Adeegyada Tabarruca (Volunteer Services Coordinator).
- B. Dhamaan Shaqaalahaha dugsiga waxaa loola jeedaa qof kasta oo siinaya adeegyo tabarrucaad dugsiga ama degmada, kana siinaya Xiriiriyaha Adeegyada Tabarruca ka hor inta aanu aqbalin bixinta adeegyada, iyo ka hor inta aan loo oggolaan tabarruc bixiyaha inuu la xiriiro ardayda.

***Qawaaniinta la Habraacyo (Legal References:***

Minn. Stat. §13.43 (Personnel Data)

Minn. Stat. §123B.02 (General Powers of Independent School Districts)

Minn. Stat. §123B.03 (Background Check)

Minn. Stat. §466.01 (Definitions)

Minn. Stat. §466.07 (Indemnification)



**Habraacyada kale ee la eegayo (Cross References):**

MPS Policy 1040	(Student and Staff Data Protection)	(Waafaqidda Xeerka Sir-haynta)
MPS Policy 1301	(Community Partners)	(Wadaagayaal Bulsho)
MPS Policy 4000	(Equal Employment Opportunity)	(Fursad Shaqo Loo siman Yahay)
MPS Policy 4001	(Disability Non-Discrimination)	(Takoor la'aanta Naafada)
MPS Policy 4002	(Harassment and Violence Prohibition)	(Handadaada & Rabshadaha Reebban)
MPS Policy 4010	(Communicable and Infectious Diseases Affecting Employees)	(Cudurrada la Isqabadsiyo Saamaynayana Shaqaalah)
MPS Policy 4020	(Tobacco Use, Non-Student)	(Isticmaalka Tubaakada, ka reebban arday)
MPS Policy 4025	(Drug-Free and Weapons-Free Schools and Workplace)	(Dugsiyo iyo Goob shaqo ee ka caaggan Hubka iyo Maandooriyeasha)
MPS Policy 5200	(Citywide Discipline Policy)	(Nidaamka anshaxa Magaalada-oo-idil)
MPS Policy 5201	(Bully and Hazing Prohibition)	(Xoog-sheegad iyo Ku-khasbid Reebban)
MPS Policy 5631	(Drug-Free Schools, Chemical Health, Chemical Use and Abuse)	(Dugsiyo ka Caaggan Maan-dooriyeyaasha, Waxyaabaha La Ilaaliyo, Isticmaalka Kiimikaalka iyo kiimikaalka ku-talax-tegidda/xad-dhaafka ah)
MPS Policy 5635	(Reporting Maltreatment of Minors and Vulnerable Adults)	(Soo sheegidda si-xun-ula-dhaqmidda dhallaanka iyo Waaweyinka Baylahda u ah)
MPS Policy 6230	(Field Trips)	(Safarrada Rixladaha)
MPS Policy 6415	(Internet and Educational Network Use)	(Isticmaalka internet-ka iyo Shabakadaha Waxbarasheed)
MPS Policy 6521	(Athletics, Co-curricular Activities, Clubs and Organizations)	(Cayaaraha Fudud, Waxqabadyada ka baxsan Manhajka, Naadiyada iyo Ururrada)
MPS Policy 6682	(Emergency Procedures)	(Habraaaca Xaaladaha Deg degga ah).